

KU DHAQAN XAFIISKA D.



Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad

Muqdisho, 15 Febberayo 1975

L. 2, R. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraaha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 15, Tr. 30 Disembere 1974 — *Sharciga Misaaniyadda Sannadka 1975.*

Bog. 93

SHARCI L. 16, Tr. 9 Febberayo 1975 — *Aqoonsasho Howqab Abaalgud gaar ahaaneed.*

» 10S

BOGGA LABAAD


XEER

W. M.

BOGGA SADDEXAAD

TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

W. M.



BOGGA KOOWAAD S H A R C I

SHARCI L. 15, Tr. 30 Disembere 1974.

Sharciga Miisaaniyadda Sannadka 1975.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU Rasmi ahaan u soo saaraayaa Xeerkaan hoos ku qoran;

Qodobka 1aad

Miisaaniyadda

Dawladdu waxay awood u leedahay inay soo ururiso Dakhliga iyo inay bixiso kharajka ku dhigan Miisaaniyadda halkan ku xiran ee dhan Sh. So. 953.456.465, marka laga bilaabo ida Jenayo ilaa 31ka Disember 1975 iyadoo la raacayo habka iyo ni daamka ku qoran sharciyada lacagta.

Qodobka 2aad

Isbaddelka

1. Isbaddelka dhex mara laba madax oo kala duwan waxa awood u leh Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha.

2. Isbaddelka dhex mara madax-xigeenada isku madax amba ha ahaadeen kharashka caadiga amba ha ahaadeen mashruucyada waxa awood u leh Xoghayayha Wasaaradda Maaliyadda.

3. Isbaddelka lacagta hoos timaada madax-xiga walba oo u ka la dhigan xuruufta waxa awood u leh Xoghayayaasha Wasaaradaha. Isbaddelka caynkaas ee ku saabsan Miisaaniyadda Dawladaha Hoose waxa awood u leh Gudomiyayaasha Gobolada.

Qodobka 3aad

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadu wuxuu awood u looyahay haddi loo baahdo in uu kayd ka dhigo dhammaan ama qayb lacagta ku jirta madax xige walba miisaaniyadda sannadkan 1975.

Qodobka 4aad

Sharciganj wuxuu dhaqan galayaa ida Jennayo 1975 Waxaanu ka mid yahay Sharciyada rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 30 Disembere 1974.

S. G. Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA

WARBIXIN MIISAANIYADEED 1975

1. 1974 waxaa ku buxsamay sanadkii shanaad ee Miisaaniyadda tan iyo intii Kacaanku dhashay. Sanadka gudihiisana talaabooyin dhawra ayaa dhalku qaaday haddii laga eego dhinac walba, Kacaanku waa dhismay, maamulida dalkuna waxeey isubedeshey mid hantiwadaag ah oo awood dadka usiineeysa iney si lixaad leh uga qayb qaataan dhismaha iyo talada dalkaba. Fududaynta maamulka oo la bilaabay 1971 si wacan ayey u hirgashay. Taasuna waxeey awood dawladda u siisay in eey dalka oo dhan gaadho, qorsheynta dhaqaalaha iyo horumarinta bulshadana laga dhigo kuwo saldhig aqooneed ku fadhiya.

Miisaaniyadda dalku waxeey lasocotay isbedelka dalka ka socda taas oo danteedu tahay in laga dhigo hub lagu fulin karo siyaasadda Kacaanka.

2. Sanadkii 1973 waxaa la bilaabay Miisaaniyad urursan oo isugaynaysa dawladda dhexe iyo dawladda hoose. 1974 waxa la sii hageejiyey kalasocida miisaaniyadda iyo faah faahinteeda. Miisaaniyadda 1975 waxaa ku urursan dawladda dhexe, kuwa hoose iyo Wakaaladaha dawladda. Habka cusubi waa guul wayn oo horay u dhigaaya maamulidda hantida ummadda.

3. Waxa aad loo ammaani karaa sida eey dawladdu kor ugu qaaday dakhliga. Shantii sano oo u dhexaaysey 1969-1974 dakhligu wuxuu kordhay 110% ama 20% sanadkiiba, kordhiimahaas waxa ugu wacan tolayntii hantida, Sicirka aduunka oo kor u kacay, Keenidda badeecadda oo korortay iyo ururinta lacagta oo lagu dadaalay.

4. Kharashku siyaabo kala duwan ayuu u kordhay afartii sano oo u dhexaaysey 1969-1973 wuxuu kordhay guud shaan 31% lana mid ah 7% sanadkiiba. Sanad lacageedka 1974 xaalkiisu waa gooni. Kharashka caadiga ahi wuxuu kordhaayaa 33% marka loo eego 1973. Korsiimahaasu wuxu ka badan yahay dhamaan kuwii muddadii u dhexaysay sannadihii 1969-1973. Sababtu waa mushaharka shaqaalaha oo batay iyo kharashka ololaha horumarinta 1971 waxa la fuliyey 49% laakiinse 1973 inta la fuliyey waa in macquul ah. Tan loo baahanyahay in halkaan lagu sheego waa kharashka horumarinta oo si baas ugu xiran kaalmada iyo deynta shishaayaha oo ahayd 60% (1971) — 75% (1973) — 67% (1974-1978).

5. Inkasta oo kharashku kor u kacay miisaaniyadda dawladdu marna iskuma deyin ineey lacag abuurto (inflation), Waxa kale oo jirta in lacagta dalka gudihiisa deeyn bixintu (internal financial position) aad u badatay. Wuxu kor u kacay 275 milyan. (+69.1%) 1972-1973 iyo 253 (+37.6%) December 1973 ilaa September 1974. Sanooyinkii hore deeynku wuxuu u badnaa soodegin bedeeco iyo wixi la mid ah. Sanadii u dambaysey se wuxu u badnas maalgelin iyo khiimaha oo kor u kacay. 1974 deeyn badinta talaabooyin ayaa laga qaaday waxaana suurtoowda

in natiijadeeda sanadka cusub bilahiisa la arko. Fidinta deeyntu iyo badinta khārashka dawladdu wexeey keeneen ku isticmaal xad dhaaf ah lacagta adag.

Guud ahaan lacagtu (money supply) waxba iskama bedelin taas oo muujineysa in deeynku u badnaa mid wax logu keennay. Kobid ahaan xaalka lacagtu wexeey ku urursan tahay.

TAB. 1

	<i>Dic.</i> 1972	<i>Sep.</i> 1973	<i>Dic.</i> 1973	<i>Sep.</i> 1974
Deynka	398	555	673	926
Khasnada	20	80	46	1
Lacagta adag (saafi)	293	261	249	98
Lacagta guud (Money Supply)	518	547	608	742

Sicirka kacay, keenidda badatay iyo maaliintu wexeey yaraay yeen kaaydka lacagta adag. Miisaaniyadda lacagta dibedda sanocoyinkan dambo aad beey u xumaatay taas oo ku timi keenidda badeecadda oo badatay iyo dhoofiinta oo yaraatay. Inkasta oo lacagta dibedda inaka soo gashaa eey badatay (1972-206, 1973-333, 1974-620) miisaaniyadda dibedda dhiniin (Deficit) beey kuxirantay.

TAB. 2

	1972	1973	1974
Badeecadda iyo Haawl	—167	—423	—733
Bedelid lacageed	118	180	281
Bedelid Raasumaal	154	198	384
Qalad iyo dhaafit	5	—	—
Qiyaas SDR	14	—	—
	124	— 45	— 68

6. Heerka miisaaniyadda dibaddu mareeysa wuxu inoo tiilmaamaaya in eeyno xoogeena saaro sidii wax looga qaban lahaa soo saaridda iyo dhoofinta loona yareeyn lahaa soodeginta.

7. Xoolaha oo ah lafdhabartii dhaqaalaha dalka, waxa sanadkii 1974 loogu talagalay 33.9 milyan (1973 - 14.3). Ujeedooyinka laga leeyahay horumarinta xoolaha, waxa weye in la wanaajiyo sinjiga, nooca xoolaha iyo in la kordhiyo tarankooda, lana xoojiyo caafimaadka xoolaha. Markaas ayay noo suurtoobayaa inaan d haqaale ahaan uga faa'iidayano barwaaqada xoolaha ee dalkeena. Sidaa awgeed, waxa la hirgeyiyey sanadkan 16 mashruuc oo ku taxaluga xoojinta caafimaadka xoolaha, dhalanrogga, naaxinta xoolaha iyo horumarinta iyo fidinta digaagga.

Daawad xoolaha oo sannadkii 1975 miisaaniyadda loo kordhiyey, waxay ka koobnayd So. Sh. 3 milyan oo caadi ah iyo So. Sh. 5.3 milyan O.H.R.M. loogu talagalay. Waxtarka kooxaha daaweynta xoolaha, oo qalab iyo gaadiidba u dhanyahay, waa mid dhaqaalaha reer miyiga ama dalka horukac iyo taran joogta ah u keeni doona. Maadama 1974 lagu magacaabay sanadkii dhaqaalaha, dadaalka dadka iyo dawladda kuma koobnayn xoolaha keliya, ee wuxu ku fidsana Xubnaha kala duwan ee dhaqaalaha beeraha, barwaaqada badda iyo berriga.

8. Beeraha waxa lagu isticmaalay maalgelin ballaaran, iyadoo loo jeedo in la gaaro isku fillaansho deg deg ah, xagga cuntada xabuubka, kordhinta tacabka miraha iyo alaabta ceyrin oy u baahan yihiin Warshaduhu. *Hase yeeshe, tacabkii hoos buu u dhacay, sababto ah roob yari iyo isdhimida biyaha Webi Shabeelle.* Sidaa darteed, mashaariicda horumarintu, waxay xoog saarayeen xoojinta waraabinta iyo dhismaha biyo-xireenada, si lo ballariyo dhulka ka durugsan agagaarka Webiyada; isla markaana laga faa'idalsto xoogga biyaha oo laga dhaliyo xoogga korontada.

Waxa kaloo si xoog leh looga dhaqaaqay baarista iyo beerista miro kala duwan, oo xagga cuntada iyo dhoofinta dibedda qaayo weyn lahaan kara, haddii ay guul ku dhammaadaan. Mashaariicda beerista Timirta, Suufka, Liinta macaan, Buuriga iyo Bariiska dhammaan heer bilow ah ma dhaafin.

Dhismaha Iskaashatooyinka beeraha, oo u horseedaya hantida tacab-wadaagga ah, waxa la siiyay kaalmo xoog leh, si ay iska-waxuqabso ugu dhistaan makhaasiino, xaafiisyo, uguna gataan qalabka beeraha. Isla sanadkaasna Mashruuca deg-degga ah ee cuntadu talaaboyin dheer buu qaaday.

9. Muddo dheer ayaa la oga, in dalka Soomaaliya oo la beeri karo, u ballaaran yahay, dhowaan ayaa la ogaaday yididiilada weyn ay Soomaaliya leedahay dhinaca soosaaridda kalluunka. Waxa xil weyn layska saaray sidii loo kordhin lahaa soosaaridda iyo dhoofinta barwaaqada badda oo baahi weyn loo qabo suuqa dibedda iyo gudahaba. Sanadkan gudihiiisa, wax-suurtogal noqday in la abuurro 20 Iskaashatooyin kalluumaysatada, iyadoo looga jeedo in noloshooda kor loo qaado, in tacabka kalluunka la badiyo. Iskaashatooyinka waxa ku baxay lacag dhan So. Sh. 5 filyan, taasoo lagu dhisay saldhigyo, qalab loo iibiyey ama doonyo iyo gaadiid.

Si looga faa'idayato kalluumaysiga badweynta, waxaan heshiis la galay dalka Midowga Sofiyeeeti oo dhinaca sahamiska naga taageeray. Kadibna, waxa wadajir labada dawladood u abuureen Shirkad Kalluumaysi oo lagu ismay «Somalifish» oo door weyn ka ciyaari doonta xagga horumarinta guud ee kalluunka. Waxay kaloo Shirkaddu maamuli doonta tababarka iyo taageerada Iskaashatooyinka. Tacabkii kalluumaysigu kor ayuu u kacay, sanadkan waxa nasoo gashay So. Sh. 7.7 milyan (1973 - 3 milyan). Isla sanadkan, waxa hirgashay Shirkadda Gaadiidka Badda, oo hadda maamusha afar markab oo labo muuska qaado, midna xoolaha,

midna badeecadda caadiga qaado. Maraakiibtaas waxay ku kaceen So. Sh. 80 milyan. Dawladda Carabta ee Liibya ayaa dhowaan nala shirkooday oo boqolkiiba 49% raasumaalka la wareegtay.

10. Tacabka xoolaha, beeraha iyo badda sanadba kan ka dambeeya, Warshadaha dalka ayaa sancadeeya. Warshadaha dawladdu waxay soo saareen tacab u qiimihiisu dhanyahay So. Sh. 309.6 milyan, una kala baxa badeeco dalka gudahiisa lagu isticmaalay (So. Sh. 226.6 milyan) iyo badeeco libedda loo dhoofiyeey (So. Sh. 43 filyan) lana mecna ah, lacag adag oo wadanka soo gashay.

Hawlaha Warshadaha laga qabtay waxay u kala qaybsameen: cusa-ybinta warshadihii hore, ballaaris ama hagaajin iyo hirgelinta mashaariic cusub oo irjta ama ka baxsan qorshaynta shanta sano. Dhammaan 10 mashruuc oo wax laga qabtay, waxay ku kaceen So. Sh. 87.1 milyan oo So. Sh. 55.2 dalka gudahiisa laga maalgeliyeey (dibedda - 31.9 milyan).

Waxa kaloo gacanta la saaray mashaariic aan ku jirin qorshaynta Warshadda Hargaha ee Kismaayo. Waaaxne runtii guul ahaa diyaarinta dhismaha saddex Warshadood oo gallayda shiida Warshadahaas oo laga dhisi doono Xamar, Burco iyo Galkacayo, waxa ku bixi doona So. Sh. 13.9 milyan.

11. Ulajeedada ugu weyn ee dhaqaalaha, waa munafacaadka dadka misna dadka keliya ayaa hormariya dhaqaalaha iyo dhaqanka, hadday aqoon cilmi iyo caafimaad helaan. Sanadkan 1974 waxa dalka ka curtay kacaan tacliimeed, kadib amrkii la hirgeliyeey qoraalka Af Soomaaliga. Siyaasadda cusub ee tacliinta waxa saldhig u ah: hirgelinta Far Soomaaliga, waxbarashada dadka waaweyn, O.H.R.M. iyo fidinta guud ee waxbarashada.

Ololaha Horumarinta Reer Miyiga waa ujeedooyin badan tahay waxay ballan qaadaysa faafinta akhriska iyo qorinka, badbaadinta caafimaadka dadka, daaweynta xoolaha iyo tirinta guud ee dadka iyo eeolaha soomaaliyeed oo dhan. Ololahaas ay kumanaal arday, shaqaale iyo Ciidamada Qalabka Sida ka qayb galeen, waxa loogu tala galay kharash aan ka yarayn So. Sh. 22.3 milyan. Inkaasta oo u run ahaan labajibaarkeed gaaray.

12. Iyadoo lagu cilmi qabo dawrka wayn u ka ciyaaro Raadiyuhu xagga warfaafinta hanuuninta iyo faafinta waxbarashada, ayaa la hirgeliyay mashaariic xoojinaysa Raadiyaha Muqdisho iyo Hargeysa. Waxa kaloo gobollada laga dhisay saldhigyo loogu talagalay warfaafinta iyo isgaarsiinta wararka. Waxa kale oo qabqaabadeeda lagu jira Radiyaha laayaska arko (TV.).

13. Siday ballantu ahayd waxaa sannadka 1975ka la sii waday howshii ku saabsanayd isku uruurinta Miisaaniyadaba xubnaha Dawladda oo dhan. Runahaantii sannadka 1975 waxaa Miisaaniyadda Dawladda lagu soo daray Miisaaniyadaha Wakaaladaha. Haddaba Miisaaniyadda Dawladdu waxay ka kooban tahay Miisaaniyadda Dawladda Dhexe kuwa Dawladaha Hoose iyo kuwa Wakaaladaha. Isugeyntoodu iminka way

dhantahay isla markaana waxay muujineysaa kala baxsanaantooda. Si daasina waxaa surtoogelisay habkii cusbaa ee miisaaniyadda loo dajey sannadkii hore.

14. Sannadka 75 dhakliga iyo kharashka guud waxay gaarayaan lacag dhan Shs. 1.376.974.397, lacagtaasoo ka badan Shs. 181.619.212 (15%) markii la barbar dhigo qiyaastii 1974 lacag dhan shs. 953.456.465 (69%) oo ka mid ah lacagta kor lagu shaagay waa miisaaniyadda dawladda, inta kale oo dhan Shs. 423.517.932 (31%) waa lacagta ku baxaysa mashaa-riicda ka baxsan miisaaniyadda.

15. Lacagta Miisaaniyadda Dawladda ee 1975 waxay ka badantahay tii 1974 lacag dhan Shs. 85.090.010 (10%). Dakhlige jooftada ihi wuxuu dhanyahay Shs. 871.820.992 (91%), kharashka jooftada ahna waxaa lagu qiyaasay lacag dhan Shs. 633.297.437 (66%). Waxa halkan ka muuqaneysa dheeraad dhan Shs. 238.523.555 (25%) waxaana la galinaysa Miisaaniyadda raasumaalka.

16. Dakhlige jooftada ihi wuxuu kor u kacay lacag dhan Sh. 129.019.988 (17%) haddii la garab dhigo qiyaastii 1974. Lacagta dhan Shs. 70.677.906 oo ka mid ah lacagta kororsiimada waxa lagu qiyaasay inay ka imaana-yso, cashuurta wax soo-saaridda iyo kharashka. Isla madax-xige ahaan waxaa ka soo galeysa lacag dhan Shs. 485.113.133 oo dhan (56%) dakh-lige jooftada ah. Wax kale oo isaguna in la sheego u baahan dakhlige hantida oo keenaya kororsiima dhan 61.834.255. Waxaana ka soo galeysa lacag dhan Shs. 244 693.972 (28%) dakhlige jooftada ah.

Guud ahaan kororsiimada dakhlige jooftada ah waxaa u sabab ah ascaarta oo kacday taasoo keentay in qiimaha lagu cashuurayo bato iyo ballarashada hawlaha Wakaaladaha.

17. Kharashka jooftada ah waxaa ku birtay lacag dhan Shs. 58.598.458 (10%) haddii loo eego qiyaastii 1974. Sababaha u kharashkani la kordhay waxay yihiin dad badan oo shaqooyin la siiyey iyo hawladii oo bal-laartay.

18. Miisaaniyadda raasumaalka ihi waxay gaareysaa lacag dhan Shs. 320.159.028 waxaana ku kordhay Shs. 26.491.552 (9%) markii loo eego tii sannadkii hore. Dakhlige miisaaniyaddan waxa ugu weyn dheeraadka miisaaniyadda jooftada ah oo dhan Shs. 238.523.555. Dakhliyada kale ee miisaaniyadani waxay is dhimeen Shs. 43.929.978 waxaana ugu wacan amaahdii Dawladdu soo qaadan jirtay oo layaareeyay. Miisaaniyadan inteeda badan waxaa lagu kharash gareeynayaa hantigelinta muuqda. Miisaaniyadan waxaa ka dhiman lacag dhan 74.248.310 waxaana lagu kabayaa deynta intaa leeg.

19. Sidaan horeba u sheegnay miisaaniyadda waxay ka koobantahay Miisaaniyadda Dawladda dhexe kawa Dawladaha hoose iyo kuwa Wa-kaaladaha markii la isku darayey miisaaniyadahaa waxa ka baxay wixii xubnuhu is weydaarsadeyn waxaana la qaatay xaasilka keliya.

Markaa Dakhliga Daw. Dhexe wuxuu noqday Shs. 585.848.310 waxaaneey tahay 61% ee Miisaaniyadda Dawladda dhan; kharashkeeduna wuxuu dhanyahay Shs. 694.100.000 oo ah 73%. Isdhimidda halkan ka muuqataawaxaa lagu kabayaa dheeraad laga helay Miisaaniyadda Wakaa-ladaha.

Dakhliga iyo kharashka Dawladaha Hoose waxa lagu qiyaasay inay isku dhawyihiin waxayna imaanayaan 7% miisaaniyadda Dawladda dhan. Sidaana waxaa la gaarayaa markii la eego xaasilka ka soo baxa isdhaaf-dhaafka lacageed ee dhexmara Dawladda dhexe iyo Dawladda Hoose.

Haddii aan u nimaadno Wakaaladaha, dakhligoodu wuxuu noqonayaa Shs. 296.279.845, oo ku imaanayaa 32% miisaaniyadda dhan. Kharashkooda waxaa lagu qiyaasay Shs. 187.230.085 (20%). Dheeraadka halkan ka soo baxaya waxaa dhammaantiiba lagu wareejinayaa Miisaaniyadda Dawladda Dhexe si loogu buuxiyo iodhimmeeda. Halkan waxaa lagu cadeynayaa inaan Wakaaladaha miisaaniyadda dhan loo gelinin dakhligooda iyo kharashkooda joogtada ah ee loo galiyey kaliya xaasilka. Sidaa daraadeed dakhliga alaabada iyo hawlaha ee miisaaniyadda Dawladda dhan kuma jiraan ka wakaaladahu. Sidaasoo kalo waxaa laga yeelay kharashka shaqaalaha iyo alaabada.

20. Dakhliga iyo kharashku Dawladda dhexe waxaa lagu qiyaasay sannadka 1975 Shs. 705.100.000 waxaana ku kordhay lacag dhan Shs. 37.307.153 (6%) markas loo eego qiyaastii Dakhligo joogtada ihi wuxuu noqonayaa 667.682.394 (95%) dakhliga idil. Kharashka joogtadihisa waxaa noqonayaa Shs. 583.170.462 (83%) Kharashka idil. Harkaa waxaa ka soo baxay dheeraad joogtada ah oo noqonaya Shs. 83.911.932. Dakhliga joogtada ah waxaa ku kordhay lacag dhan Shs. 64.732.394 (11%) kolka loo eego kii sannadkii hore kharashka joogtada ihi wuxuu kor u kacay 48.701.760 (9%) marka la barbar dhigo kii 1974, markaa waxaa inoo soo baxayaa dheeraad joogta ah oo ka badan kii sannadkii hore lacag dhan Shs. 16.030.634 (24%).

21. Meelaha ugu waaweyn ee dakhliga kordhay ka yimid waxaa ka mid ha:

- Cashuurta keenida alaabta; waxayna kor u kacday Shs. 35.000.000 sababtuna waxay tahay ascaarta dibadda oo badatay.
- Cashuurta maamulka iyo tirada waxa ku biirtay Shs. 14.000.000 sababtuna ta hore ayey ku xirantahay.
- Cashuurta sonkorta iyo khamriga, waxa ku kordhay Shs. 20.000.000 sababtuna waxay tahay heerkii cashuurta oo kor loo qaaday.
- Cashuurta gadidda iyo qaybta faa'iidada ee Wakaaladaha wax ku kordhay ku dhowaad Shs. 5.000.000 sbabtuna waxay tahay balla-rashada hawlaha wakaaladaha.

22. Kharashka joogtada ah ee kordhayna wuxuu ka yimid shaqaalaha iyo alaabada waxaana u sabab ah hawlahii Dawladda oo batay. Tusaala ahaan waxaan u qaadan karnaa Wasaaradaha hoos ku taxan oo mid walba lacagta ku hor qorani kharashkeeda joogtada ah ku biirtay:

Wasaaradda Caashaandhigga	Shs.	12.500.000
» Waxbarashada iyo Bar.	»	7.705.018
» Beeraha	»	6.118.496
» Tacliinta Sare	»	5.814.767
» Gaadiidka	»	3.140.518

23. Sidaan horeba u sheegnay miisaaniyadda joogtada ah waxaa ka soo baxaya dheeraad dhan Shs. 83.911.932, kaasoo lagu darayo miisaaniyadda raasumaalka ah kana noqonaysa lacagteeda oo dhan Shs. 121.929.538.

Kharashka miisaaniyadda raasumaalka wuxuu badankiisu ku baxayaa hantigeliin Dawladdu toos u saayneyso miisaaniyadda raasumaalka waxay isdhimaysaa Shs. 23.348.310 waxaana lagu kabayaa deynta dibadda.

Hantigeliinka waxaa ugu muhiimsan kan ay sameyneyso Wasaaradda Sancadda oo lagu qiyaasay Shs. 24.020.000 looguna talagalay dhismaha Warshadaha iyo Makiinadahooda, ka Wasaaradda Beeraha oo dhan Shs. 18.749.000 oo lagu kharash gareynayo mashaariicda biyo waraabinta iyo makiinadaha, ka Wasaaradda Macdanta iyo biyaha oo gaaraya lacagta dhan Shs. 15.843.750.000 looguna talagalay mashaariicda biyada, ka Waxbarashada oo lagu qiyaasay 7.750.000 oo lagu kharash gareynayo dugsiya cusub oo la dhisayo.

24. Haddii aynu kharashka Dawladda dhexe hawl iyo dhaqaale ahaan u kala socno waxaa la qiyaasayaa (Markii laga saare deyn gudiga) inay hawlaha guud qaadanayaan. Shs. 314.187.072 (45%) oo dhamaanteedba ah kharash joogta ah. Hawlaha beesha iyo dhaqaalaha waxay ku kacaayaan lacag dhan 231.769.702 (34%). 62% oo lacagtan dambe ka mid ah waa kharash joogta ah inta kalena waa kharash raasumaal ah.

Ugu dambeyn kharashka hawlaha mujtamaca wuxuu dhanyahay Shs. 142.362.551 (21%) wuxuuna u badanyahay mid joogta ah (91%).

25. Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose ayagoo isku jira waxa lagu qiyaasay lacag dhan Shs. 77.915.570, taasoo ka badan Shs. 3.000.311 (4%) tii sannadkii hore.

Inkastooy miisaaniyadu guud ahaan isxirayso haddana labadooda dhinac, ka joogtada ah iyo raasumaalka isma dhelitriyaan. Sida dhabta ah dakhliga joogtada ahi wuxuu dhan yahay Shs. 76.387.714 (98%). Kharashka joogtada ihina wuxuu gaarayaa Shs. 55.177.379 (71%), had-daba meeshan waxaa ka soo baxaya dheeraad joogta ah oo dhan Shs. 21.210.335 oo lgau kabayo isdhimidda miisaaniyadda raasumaalka.

26. Markii loo eego sannadkii ina dhaafay dakhliga joogtada ah waxaa ku kordhay lacag dhan Shs. 10.952.861 (17%) sababta ugu weyn ee dheeraadkan keentay waxay tahay Dawladda Hoose ee Xamar oo aad u kordhisay hawsheedii ganacsiga, xaasilkii ka soo baxayna miisaaniyadda ku soo darsaty. Hase ahaatee dakhliga joogtada ahi uma kordhin sidii laga filaayey maxaa yeelay abaartii oo guud ahaan hoos u dhigtay dakhligii degmooyinka qaarkood. Waxa kaloo ayaduna waxyeela kule dakhliga Miisaaniyadda Dawladda Hoose in sannadkan Miisaaniyadahaoodu laga reebay lacago hore loogu shubi jirey ay kana mid yihiin lacagtii iskaa-wax-u-qabso iyo dakhligii ka soo gali jiray galleyda oo hadda loo warsejiay laamaha ganacsata.

27. Kharashka joogtada ah waxa ku korortay lacag dhan Sh. So. 8.679.307 (19%), waxaana u sabab ah kharashka shaqaalaha iyo kan alaabada iyo hawlaha ee Dawladdaha oo kordhay kharashyada aad u kordhay waxa ka mid h maamulka laamaha ceelasha oo Dawladaha Hoose lagu wareejiyay iyo shaqaal cusub oo la qoray.

28. Miisaaniyadda raasuumaalka ahi ee Dawladda Hoose waxa lagu qiyaasay sannadka 1975 lacag dhan Sh. So. 22.738.191 waxaana dhammaantaad wax yar mooyaane laga masruufayaa dheeraadka miisaaniyadda joogtada ah. Lacag dhan So. Sh. 14.211.014 (62%) waxa lagu kharashgareynayaa hantigeliin ay Dawladaha Hoose toos u sameynayaan, inta kalene waxa loogu talagaley lacag wareejin ah oo la siinayo Dawladda Dhexe iyo deyn guud.

Haddii kharashka Dawladaha Hoose, marka laga reebo deyn gudida, loo kale-sooco hawl iyo dhaqaale ahaan waxa la qiyaasayaa in hawlaha guud qaadanayaan lacag dhan So. Sh. 31.747.429 (42%). Lacagtaasi waxay ka kooban tahay kharash joogta ah (47%) iyo mid raasuumaal ah (53%). Hawlaha beesha iyo dhaqaalaha waxa ku baxaysa lacag dhan So. Sh. 36.085.166, waxayna u badantahay kharash joogta ah (93%). Hawlaha mujtamaca waxa ku baxaysa lacag dhan So. Sh. 7.344.988, dhammaanteedna waa kharashka joogtada ah.

30. Sidii aan horeba u sheegnay sannadkan 1975 waa kii ugu horreeyey ee miisaaniyadaha wakaaladaha lagu daray tan Dawladda, Taasna waxa loo yeelay si loo kormeero hantida guud ee dalka, isla markaana laga maamulo meel keliya.

31. Guud ahaan miisaaniyadda Wakaaladuhu waxay muujinaysii marka uga reebo wareejinnada dhexmara iyaga iyo Dawladda Dhexe, dakhligii guud oo lagu qiyaasay Sh. So. 296.170.845; taasoo ka badan kii sannadkii hore lacag dhan Sh. So. 58.286.899 (24%). Qodobka ugu muhiimsan ee dakhliga wakaaladuhu waxa weeye macaashka guud ay sameeyaan, waxana lagu qadaray Sh. So. 237.983.682 (80%). Lacagtan waxa ku jira cashuurta, faa'iidada, qeybta faa'iidada Dawladda iyo kaydyada kala duwan. Qodobka kale oo isna muhiim ihi waa amaahda ay gudaha iyo dibedaba Wakaaladuhu ka soo qaadanayaan waxayna noqoneysaa Sh. So. 50.900.000.

32. Dakhliga kor lagu soo faahfaahiyey ee Wakaaladaha waxa lagu kharashgareynayaa hantigelliin ay ku baxayso lacag dhan Sh. So. 159.859.747. Hantigelliinkani wuxu ka koobanyahay mid raasumaal raaga ah (dhismo, qalab iwm) oo ku kacaya Sh. So. 123.320.036, iyo mid badeecad ah oo isna ku kacaya 36.539.711. Wakaaladahu dakhligooda waxay ka gaadanayaan lacag dhan Sh. So. 25.210.062 oo ay ku kordhisnayaan hantidooda lacagta ah. Lacagta dhan Sh. So. 109.040.760 waa lacagta saafiga ah ay u wareejinayaan Dawladda Dhexe. Lacagtaasi waxay u kala baxdaa cashuurta gadidda oo dhan So. Sh. 54.475.311, qaybta faa'iidada Dawladda oo lagu qiyaasay Sh. So. 50.107.083 iyo wareejin raasumaal oo saafi ah oo dhan Sh. So. 4.458.366.

GABAGABEEYN

Sanooyinkaan dambe dadaa lku wuxuu ahaa in la gudbo dheeliga Miisaaniyadda iyo in xal loo helo wixii yar yar oo la mid ah. Haddase ka dib markii eey badateen mashaakilka dalka oo u baahan xal waxaa lagama maarmaan ah in miisaaniyadda lagu fadhiisyo sal dhaqaale. Cashuur badan oo hartay majirto inkastoo oo eey karta lagama maarmaan in iyada xataa si wacan loo habeeyo. Siceyno hantiwadaagga ugu helo sal dhaqaale waxaa loo bahan yahay isbeddel weyn oo ku saabsan dhaqaalaha dalka. Isbeddelkaasu waa in uu saamaay yaa (1) Xagga beeraha; (2) Xoolaha; (3) Kalluunka; (4) Sancada; (5) Aqoonta iyo halka deeyn bixinta.

Midda ugu weyn oo loo baahan yahay waa in eeynu ognahay waxa eeynu rabno iyi sida eeynu ku heli lahaayn hubki iyo qalabkii eeynu ku gaari lahaayn wexeeynu rabno. Wexeeynu u baahannahay qorshaayn aqoon iyo cilmi ku fadhidda. Waa in eeynu naqaan intee ba eeynu u baahannahay si marka hore eeynu ugu yaraan uga maarano cunada dibedda laga keeno, islamarkaasna waa in eeynu naqaan haa eeytahay in uu ka soo baxo.

Sidaas si leeg waa in eeynu ka qabanaa kalluunka. Deg deg ahaan waa in eeynu badinaa aqoonta badda, marakiibta lagu jilaabo kalluunka iyo warshadahaba. Hora udhigga beeraha iyo kalluunku wuxu surtagelinayaa horumarinta warshadaha. Waxa eeynu rabno wexeeynu ka gaari karna qorshaayn keli ah. Qorshaayntaas oo ku fadhidda siyaasadda kacaanka oo hantiwadaag ah. Siyaasadda hantiwadaaga ahii waa midda keli ah oo u daryeeli karta danaha dadka, xornimadda dalka na xaqiijin-karta. Bedelaad ama isku deyd in labedelo siyaasadaas iyo fekeraadaas wexeey ka soo horjeedaan filosofiyadda kacaanka danaha dadweynaha, waana in aan la ogolaan. Kacaanku waa in uu marwalba diyaar u yahay si uu ku hubiyo in hantiwadaaga noqdo mid waara.

MIISAANIYADDA DAWLADDA EE SANNADKA 1975

DAKHLIGA IYO KHARAJKA GUUD

<i>Tilmaan</i>	<i>1974</i>	<i>1975</i>	<i>Faraq</i>
Miisaaniyadda Dawladda	868.366.455	953.456.465	+ 85.090.010
Qaybta Mashaariicda ee ka baxsan Miisaaniyadda	326.988.730	423.517.932	+ 96.529.202

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHAN

I. — SOO KOOBIDDA DAKHLIGA IYO KHARASHKA

Dakhliga	1974 Kunoqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq	Kharashka	1974 ku noqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq
Dakhliga joogtada ah	742.801.004	871.820.992	+ 129.019.988	Kharashka joogtada ah	574.698.979	633.297.437	+ 58.598.458
Dakhliga raasumaalka	125.565.451	81.635.473	— 43.929.978	Kharashka raasumaalka	293.667.476	320.159.028	+ 26.491.525
Isugeyn	868.366.455	953.456.465	+ 85.090.010	Isugeyn	868.366.455	953.456.465	+ 85.090.010

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHAN

2. — DAKHLIGA IYO KHARASHKA U QEYBSAN DHAQAALE AHAAN

Dakhliga	1974 Kunoqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq	Kharashka	1974 ku noqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq
Dakhliga joogtada ah				Kharashka joogtada ah			
Cashuurta wax soo saaridda iyo kharashka	414.435.227	485.113.133	+ 70.677.906	Shaqaalaha	282.241.638	318.237.640	+ 35.996.002
Cashuurta dakhliga	52.390.971	48.937.393	— 3.453.578	Alaabada iyo hawlaha	239.886.749	247.839.968	+ 7.953.219
Wareejinta cale ee gudaha	5.571.202	2.094.283	— 3.476.919	Wareejinta joogtada ah	52.570.592	67.219.829	+ 14.649.237
Dakhliga hantida iyo dheeraadka dhan ee Wakaal.	182.859.717	244.693.972	+ 61.834.255				
Dakhliga allaabada iyo Hawlaha	60.543.887	75.982.211	+ 15.438.324				
				Isugeyn kharashka joogtada ah	574.698.979	633.297.437	+ 58.598.458
Wareejinta joogtada ah ee dibedda	27.000.000	15.000.000.	— 12.000.000	Dheeraadka joogtada ah	168.102.025	238.523.555	+ 70.421.530
				Isugeyn	742.801.004	871.820.992	+ 129.019.988
Isugeyn	742.801.004	871.820.992	+ 129.019.988				

Dakhliga	1974 Kunoqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq	Kharashka	1974 ku noqoshada Qiyaasta	1975 Qiyaas	Faraq
Dakhliga raasumaalka				Kharashka raasumaalka			
Dheeraadka joogtada ah	168.102.025	238.523.555	+ 70.421.530	Hantigeliinka dhan	210.282.917	253.436.147	+ 43.153.230
Wareejinta raasumaalka	13.000.000	7.387.163	— 5.612.837	Wareejinta raasumaalka	42.475.145	19.833.881	-- 22.641.264
				Kordhinta hantida lacagta	19.440.363	25.210.062	+ 5.769.699
Amaahda	112.565.451	74.248.310	— 38.317.141	Bixinta daynta	21.469.051	21.678.938	+ 209.887
Isugeyn	233.667.476	320.159.028	+ 26.491.552	Isugeyn	293.667.476	320.159.028	+ 26.491.552

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHAN

3. — DAKHLIGA IYO KHARASHKA U QEYBSAN DHAQAALE AHAAN IYO XUBIN AHAAN

Tilmaan	1974 Ku Noqoshada Qiyaasta				1975 Qiyaas			
	Dawladda Dhexe	Dawladda Hoose	Wakaaladaha	Isugeyn	Dawladda Dhexe	Dawladda Hoose	Wakaaladaha	Isugeyn
Dakhliga								
Canshuurta wax soo saar- rida iyo kharashka	392.200.000	22.235.227	—	414.435.227	462.500.000	22.613.133	—	485.113.133
Canshuurta daklīga	41.000.000	11.390.971	—	52.390.971	38.000.000	10.937.393	—	48.937.393
Wareejinta kale ee gudaha	700.000	4.871.202	—	5.571.202	800.000	1.294.283	—	2.094.283
Dakhlīga hantida iyo dheer- raadka dhan ee Wakaal.	5.240.000	1.955.771	175.663.946	182.859.717	4.800.000	2.410.290	237.983.682	244.693.972
Dakhlīga alaabada iyo hawlaha	36.300.000	24.243.887	—	60.543.887	41.900.000	34.082.211	—	75.982.211
Wareejinta joogtada ee dibedda	27.000.000	—	—	27.000.000	15.000.000	—	—	15.000.000
Wareejinta raasumaalka	—	—	13.000.000	13.000.000	—	—	7.387.163	7.387.163
Amaahda	55.000.000	8.245.451	49.320.000	112.565.451	23.348.310	—	50.900.000	74.248.310
Isugeyn	557.440.000	72.942.509	237.983.946	868.366.455	585.848.310	71.387.310	296.270.845	953.456.465

Tilmaan	1974 Ku Noqoshada Qiyaasta				1975 Qiyaas			
	Dawladda Dhexe	Dawladda Hoose	Wakaaladaha	Isugeyn	Dawladda Dhexe	Dawladda Hoose	Wakaaladaha	Isugeyn
Kharashka								
Shaqaalaha	--255.815.126	-- 26.426.512	--	--282.241.638	--286.975.167	-- 31.262.473	--	--318.237.640
Alaabada iyo hawlaha	--222.761.889	-- 17.124.860	--	--239.886.749	--226.271.255	-- 21.568.713	--	--247.839.968
Wareejinta joigtada ah	-- 49.623.892	-- 2.846.700	--	-- 52.570.592	-- 64.873.636	-- 2.346.193	--	-- 67.219.829
Hantigelinka dhan	-- 51.260.428	-- 19.269.906	--139.752.583	--210.282.917	-- 79.365.386	-- 14.211.014	--159.859.747	--253.436.147
Warejinta raasumaalka	-- 42.475.145	--	--	-- 42,475,145	-- 19.833.881	--	--	-- 19.833.881
Kordhinta (—) hantida lacagta	--	--	19.440.363	-- 19,440,363	--	--	25.210.062	-- 25,210,062
Bixinta daynta	-- 15.107.617	-- 5.618.434	-- 743.000	-- 21.469.051	-- 16.780.675	-- 2.737.987	-- 2.160.276	-- 21.678.938
Isugeyn	637.044.097	-- 71.386.412	--159.935.946	--868.366.455	--694.100.000	-- 72.126.380	--187.230.085	--953.456.465
Wareejinta ka dhaxaysa Dawladda dhan								
Cashuurta gadidda	46.049.000	--	-- 46.049.000	--	54.475.311	--	-- 54.475.311	--
Qeybta Faa'iidada	53.861.000	--	-- 53.861.000	--	50.107.083	--	-- 50.107.083	--
Wareejinta joogtada ah ee kale	-- 737.795	+ 737.795	--	--	5.050.404	-- 5.050.404	--	--
Wareejinta raasumaalka iwm.	-- 19.568.108	-- 2.293.892	-- 21.862.000	--	8.719.700	-- 4.261.334	-- 4.458.366	--
Isugeyn	79.604.097	-- 1.556.097	-- 78.048.000	--	108.251.690	+ 789.070	--109.040.760	--

SHARCI L. 16, Tr. 9 Fbberayo 1975.

Aqoonsasho Howlqab Abaalgud gaar ahaaneed.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshadii 1aad iyo 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 5 taariikh. 31 Dishembre 1969 iyo beddelaadii ka daambeeyay oo ku saabsanaa «Howlqabka iyo Liilitirka ee Shagaalaha Dowladda iyo caruurtooda»;

ISAGOO ARKAY Dekreetada lamb. 322-120 ee 27-1-1969 diwaan-keeduna yahay 33 oo lagu magacaabay Jaallaha geeriyooday Ibrahim Cali Liban, Agaasimo Guud darajo A-2 mushaaharkuna yahay Shs. 1.400;

ISAGOO ARKAY Go'oaankii Galaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghaaayaasha Dowladda taariikhdiisu ahaa 25 Abrile 1974 oo lagu aqoonsaday daacadnimada iyo wadanimada dalkiisa uga shageenaayay Jaalle Ibrahim Cali Libaan oo geeriyooday isagoo haaya jagdaa Aggasino Guud ee Warshadda Caanaha ee Muqdisho;

WUXUU SOO SAARYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo aqoonsaday abaalgud gaar ahaanood «Howlqab Gaar ah» caruurta uu ka tagay Jaalle Ibrahim Cali Libaan ee geeriyooday isagoo haya jagada Agaasimaha Guud oo Warshadda Gaanaha ee Muqdisho.

Qodobka 2aad

Howlqabka gaarta ah waxaa lagu qaddaray lacag dhan Shs. 384,35 oo bil kasta ah, iyadoo qiyaastaasu saldhig u ah Sharciga Howlqabka iyo Liilitirka ee Shagaalaha Dowladda wuxuuna socon doonaa illaa caruurta u dhalay Jaallaha sharcigan lagu tilmaamay kan uga yari da'diisu gaareyso 16 sanadood.

Qodobka 3aad

Lacagtaa ee Howlqabka gaar ihi waxaa laga bixin doonaa miisaniyadda loogu talo galay «Howlqabka iyo Liilitirka ee Shagaalaha Dowladda».

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan golayaa marka laga bilaabo 25 Abriile 1974.

Sharcigan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 9 Febberayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jalle S. G. Moxamed Siyaad Barre